



ADAM SMITH
Serving Washington's 9th District

Barnaamijka Badbaandinta Mushaharka Wuxuu Helay Maalgelin Cusub iyo U-qalmitaanka oo la ballaariyay ee Ganacsiyada yaryar

Barnaamijka Badbaandinta Mushaharka

[Barnaamijka Badbaandinta Mushaharka](#). Waa amaah loogu talagalay inay bixiso dhiirgelin toos ah ganacsiyada yaryar si ay ugu sii hayaan shaqaalahooda mushaharka. SBA way cafin doonta amaahda haddi dhamman shuruudaha haynta shaqaalaha la buuxiyo, oo lacagaha loo adeegsado kharashyada u-qalma.

Waad ka dalban kartaa SBA 7(a) amaah bixiye kasta ama hay'ad dhigaaliyed kasta ee federaal ah oo caymis ku jirta, Midowga amaahda federaalku caymisay, iyo hay'adda Nidaamka Daynta Beeraha ee ka qayb qaadanaya. Waa inaad la tashataa deyn bixiyahaaga inuu ka qayb qaadanayo barnaamijka iyo in kale. Si aad u hesho deyn bixiye kuu dhow, guuji [halkan si aad uhesho qalabka khadka tooska ee SBA ee Deyn-bixiyaha](#).

Waxa ay tahay inaad ogaato

- [Barnaamijka SBA ee Amaah Dhaqaale, Dhaawaca iyo Musiibaba](#) ayaa dib loo fasaxay ilaa Diseembar 31, 2020 ama ilaa lacag laga waayo.
- Codsiyada Barnaamijka EIDL waa kuwo khadka tooska ah laga heli [karo halkan](#).
- PPP waxaa la kordhiyay ila [31-ka Maarso, 2021](#).
- U-qalmitaanka hadda waxaa ku jira amaah labad ee Barnaamijka Badbaadinata Mushaharka oo la iska cafin karo oo loogu talagalay ganacsiyada yaryar ee aadka u saameeyaay iyo kuwa aan macaash doonka ahayn oo leh 300 ama shaqaale ka yar.
- Qayb gaar ah oo loogu talagalay ganacsiyada aadka u yaryar ee leh 10 ama ka yar shaqaalaha iyo ganacsiyada yaryar ee ku yaalo aagagaarka dhibaataysan.
- Waxay u oggolaaneysaa ganacsiyada yaryar maqaayadaha iyo warshadaha soo dhoweynta inay helaan abaalmarino ballaaran oo ah 3.5 jeer Celcelis ahaan wadarta mushahar biil ah.
- Nidaamka saamaxa ee amaahda fudud PPP ee \$150,000 iyo waxii ka yar.

Su'aalo Dheerad ah & Adeegyada Luqadda

Maamulka Ganacsiga Yaryar: Wixii macluumaad dheeraad ah ee ka socda SBA fadlan booqo boggooda, www.sba.gov oo dooro luqadda aad doorbideyso adigoo gujinaya badhanka "Tarjum"

Xarunta Horumarinta Ganacsiga Yaryar ee Washington: Si aad wax badan uga ogaato websaydhada ee 'PPP' ama si qarsoodi ah loola kulmo la-taliye oo bilaash ah, fadlan kala xariir Xarunta Horumarinta Ganacsiga Yaryar ee Washington Websaydhkooda, www.wsfdc.org ama adoo ka wacaya (833) 492-7232.

Haddi aad qabtid su'aalo dheerad ah ama aad dhibaato ku qabtid helitaanka mid ka mid ah barnaamijiyada, fadlan si xor ah ula xiriiir Thomas Mayo Shaqaalahayga Thomas.Mayo@mail.house.gov.

Xasuusin: Macluumaadkan waxaa lagu beddeli karaa sharci cusub ama xeerar dheeraad ah oo ka socda khasnadda ama SBA.